Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha - Soomaaliya
Ministry of Planning, Investment and Economic Development

# WARSIDAHA WASAARADDA
# AGOOSTO 2026

QORSHEYN • MAALGASHI • HORUMARINTA DHAQAALAHA

## WARBIXIN KOOBAN OO KU SAABSAN HOGGAANKA, SIYAASADAHA, ISKAASHIGA IYO WAXQABADKA WASAARADDA.




@mopied

**Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha - Soomaaliya**
Ministry of Planning, Investment and Economic Development

QORSHEYN • MAALGASHI • HORUMARINTA DHAQAALAHA

# WARSIDAHA WASAARADDA AGOOSTO 2026

WARBIXIN KOOBAN OO KU SAABSAN HOGGAANKA, SIYAASADAHA, ISKAASHIGA IYO WAXQABADKA WASAARADDA.

# HORDHAC

Agoosto 2026 waxay ahayd bil ay Wasaaraddu xoogga saartay xoojinta qorsheynta ku saleysan caddeymaha, isku-duwidda hay'adaha dowladda, diyaarinta Warbixinta Waxqabadka Xukuumadda DanQaran 2022–2026, iyo dardargelinta mudnaanta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029). Bishan waxaa sidoo kale la qabtay kulamo heer sare ah oo uu Wasiirku iyo Agaasimaha Guud la yeesheen bah-wadaagta gudaha iyo kuwa caalamiga ah, iyadoo la xoojinayay iskaashiga, maalgashiga, wadaagista xogta iyo isla-xisaabtanka.



# QODOBADA WARSIDAHA UGU MUHIIMSAN

- Warbixinta Waxqabadka Xukuumadda DanQaran 2022–2026
- Kulamada iyo hoggaaminta Wasiirka
- Kulamada iyo hawlaha Agaasimaha Guud
- Siyaasadda Qaran ee Deeqaha
- Hawlaha kale ee muhiimka ah




## WARBIXINTA WAXQABADKA XUKUUMADDA DANQARAN 2022–2026

Agoosto 23 – Ra'iisul Wasaare Xamse Cabdi Barre ayaa kormeer ku yimid xarunta Wasaaradda, halkaas oo uu ku eegay halka ay marayso diyaarinta warbixinta. Wasiir Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene) ayaa la wadaagay natiijooyinka laga gaaray tiirarka Barnaamijka DanQaran iyo caqabadaha weli jira. Ra'iisul Wasaaruhu wuxuu bogaadiyey dadaalka Wasaaradda, isagoo ku boorriyey in la dardargeliyo hawsha.

Agoosto 22 – Golaha Dhaqaalaha Qaranka oo uu hoggaaminayay Guddoomiyaha Golaha, Dr. Xasan Aadan Hoosoow, ayaa lagu soo dhaweeyay Xarunta Diyaarinta Warbixinta. Khubarada iyo kooxaha farsamada ayaa Golaha la wadaagay heerka ay shaqadu marayso iyo tallaabooyinka loo marayo dhammaystirka warbixinta.

Intii u dhaxaysay 10–20 Agoosto, xarunta waxaa yimid wasiirro, agaasimayaal guud iyo mas'uuliyiin kale oo dib-u-eegis iyo xaqiijin ku sameeyay xogta hay'adahooda. Waxaa si gaar ah loo eegay waxqabadka dhinacyada amniga, caddaaladda, dib-u-heshiisiinta, xiriirka caalamiga ah, dhaqaalaha, tamarta, caafimaadka, kalluumeysiga, waxbarashada, qoyska, xuquuqda aadanaha, isgaarsiinta, warfaafinta, duulista rayidka iyo shaqaalaha rayidka.

Hannaanka xaqiijinta wuxuu sidoo kale ku lug lahaa Hay'adda Istaatistikada Qaranka, Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Islaamka, Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Wasaaradda Batroolka iyo Hay'adda NIRA. Ka-qaybgalka hay'adahan wuxuu xoojinayay in xogta lagu darayo warbixinta ay noqoto mid sax ah, la xaqiijiyey oo ku dhisan caddeymo.

Natiijada la doonayo waa dukumenti qaran oo shacabka iyo daneeyayaasha u sahlaya inay si cad u fahmaan waxa Xukuumadda DanQaran qabatay, natiijooyinka la gaaray, caqabadihii jiray iyo halka ay Soomaaliya maanta taagan tahay.

# 1, KULAMADA IYO HOGGAAMINTA WASIIRKA




## WASIIRKA OO SOO XIRAY ADEN ADDE FELLOWSHIP PROGRAM 2026

**20-ka Agoosto 2026 –** Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa si rasmi ah u soo xiray Aden Adde Fellowship Program 2026 oo ay si wadajir ah u soo qabanqaabiyeen Jaamacadda SIU iyo Madasha Minbar. Wuxuu carrabka ku adkeeyay muhiimadda aqoonta, hoggaaminta iyo hal-abuurka dhallinyarada Soomaaliyeed, iyadoo ka-qaybgalayaasha la guddoonsiiyay shahaadooyin.




## DOWLADDA SOOMAALIYA IYO WFP OO XOOJINAYA ADKEYSIGA BULSHADA IYO SUGNAANTA CUNTADA

**17-ka Agoosto 2026 –** Wasiirku wuxuu kulan la yeeshay Mudane Carl Skau, Ku-simaha Agaasimaha Fullinta ee WFP. Waxaa laga wada hadlay xoojinta adkeysiga bulshada ee abaaraha, fatahaadaha iyo saameynta cimilada, isku-xirka barnaamijyada dowladda iyo WFP, iyo in taageerada IA gaarsiiyo dadka iyo deegaannada ugu baahida badan. Labada dhinac waxay sidoo kale ka wada hadleen ballaarinta doorka ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo maalgelinta mudnaanta horumarineed ee Soomaaliya, iyadoo la raacayo NTP 2025–2029.




# WASAARADDA QORSHEYNTA IYO UNDP OO XOOJINAYA ISKAASHIGA HORUMARINTA SOOMAALIYA

**16-ka Agoosto 2026 –** Wasiirku wuxuu qaabilay Wakiilka cusub ee UNDP ee Soomaaliya, Mudane Christophoros Politis. Kulanka waxaa diiradda lagu saaray dardargelinta qorsheynta iyo hirgelinta yoolalka horumarineed, waafajinta iskaashiga NTP 2025–2029, xoojinta doorka ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo helidda habab cusub oo lagu maalgeliyo horumarka.




## WASIIRKA OO DAAHFURAY QORSHAHA DHISMAHA GOLAHA QARAN EE DADWEYNAHA IYO HORUMARINTA

**11-ka Agoosto 2026 –** Wasiirku wuxuu daahfuray qorshaha lagu dhisayo Golaha Qaran ee Dadweynaha iyo Horumarinta (National Council for Population and Development), kaas oo taageeraya in qorsheynta dalka lagu saleeyo baahiyaha dhabta ah ee shacabka, isla markaana mideeya dadaallada dowladda iyo bah-wadaagta. Goluhu wuxuu taageerayaa hirgelinta NTP 2025–2029.




## WASIIRKA OO GUDDOOMIYAY SHIRKA HOGGAANKA WASAARADDA

**9-ka Agoosto 2026 –** Wasiirku wuxuu guddoomiyay shirka joogtada ah ee Hoggaanka Wasaaradda oo lagu qiimeeyay waxqabadka waaxyaha iyo dardargelinta qorshe-howleedka rubuca saddexaad. Agaasimaha Guud iyo Agaasimayaasha Waaxyaha ayaa soo bandhigay xaaladda hawlaha, caqabadaha iyo tallaabooyinka xiga. Wasiirku wuxuu faray waaxyaha inay xoojiyaan wada-shaqeynta, isla-xisaabtanka iyo hufnaanta.




## WASAARADDA IYO JAAMACADDA SIMAD OO XOOJINAYA ISKAASHIGA CILMI-BAARISTA
`

**9-ka Agoosto 2026 –** Wasiirku wuxuu qaabilay wafdi ka socday Jaamacadda SIMAD oo uu hoggaaminayay Guddoomiyaha Jaamacadda, Dr. Cabdikarin Muxudiin Axmed. Waxaa laga wada hadlay cilmi-baarista dhaqaalaha iyo horumarinta, wadaagista xogta iyo diyaarinta daraasado taageera siyaasado iyo qorsheyn ku saleysan caddeymo, si loo dardargeliyo hirgelinta NTP 2025–2029.

# 2. KULAMADA IYO HAWLAHA AGAASIMAHA GUUD



## AGAASIMAHA GUUD OO GUDDOOMIYAY KULANKA LABA-TODDOBAADLAHA AH EE AGAASIME WAAXEEDYADA

**31-ka Agoosto 2026** – Agaasimaha Guud, Mudane Cabdifataax Cabdiqaadir Faarax, ayaa guddoomiyay kulanka laba-toddobaadlaha ah ee Agaasimaha Guud iyo Agaasime Waaxeedyada. Kulanka waxaa diiradda lagu saaray isku-duwidda shaqada, la socodka waxqabadka iyo dardargelinta qorshayaasha Wasaaradda. Waxaa sidoo kale lagu eegay iskaashiga UNDP, nidaamka maaliyadeed iyo hawlaha Q3 ee Jadwalka Ballanqaadyada Shaqo.




## MASUULIYIIN WASAARADDA AH OO ARUSHA KU SOO GABAGABEEYAY TABABAR HOGGAAMINEED

**29-ka Agoosto 2026 –** Agaasimaha Guud iyo Agaasimayaasha Waaxyaha Horumarinta Dhaqaalaha iyo Kormeerka iyo Qiimaynta ayaa ka qaybgalay tababar toddobo maalmood socday oo Arusha, Tanzania, ka dhacay. Barnaamijku wuxuu diiradda saaray hoggaaminta istaraatiijiga ah, hal-abuurka hay'adaha, maaraynta isbeddelka, adeegga dadweynaha iyo fursadaha dhaqaale ee ka dhasha is-dhexgalka Soomaaliya iyo EAC.



# AGAASIMAHA GUUD OO XOOJIYAY ISKAASHIGA SOOMAALIYA IYO JABUUTI

**22-ka Agoosto 2026 –** Wafdiga Jabuuti ayaa kulan is-xogwaraysi iyo salaan isugu jiray la yeeshay Agaasimaha Guud, kaddib kulan ay Agaasimayaasha Waaxaha Horumarinta Dhaqaalaha, Isku-duwidda Deeqaha iyo Maalgashiga la yeesheen wafdiga. Wadahadalladu waxay taabteen dhaqaalaha, ganacsiga, maalgashiga, cilmi-baarista, is-dhaafsiga aqoonta iyo Dhaqaalaha Buluugga ah.




## AGAASIMAHA GUUD OO QAABILAY WAFDI KA SOCDA DOWLADDA QADAR

**11-ka Agoosto 2026 –** Agaasimaha Guud, Mudane Cabdifataax Cabdulqaadir Faarax, ayaa soo dhaweeyay wafdi horumarineed iyo maalgashi oo ka socday Dowladda Qadar. Kulanka waxaa looga hadlay iskaashiga dhaqaale iyo maalgashi iyo fursadaha ka jira xoolaha, beeraha, kalluumeysiga, wax-soo-saarka cuntada, agabka caafimaadka iyo maalgelinta mashaariicda horumarineed.



## AGAASIMAHA GUUD OO LA KULMAY MAS'UULIYIIN DIB-U-EEGIS KU SAMEEYAY XOGTA WAXQABADKA

**10-ka Agoosto 2026 –** Agaasimaha Guud ayaa xarunta ku soo dhaweeyay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Batroolka iyo Maareeyaha Guud ee Hay'adda NIRA. Waxay dib-u-eegis ku sameeyeen xogta ay hay'adahoodu soo gudbiyeen, waxayna ansixiyeen qaybaha ay ku leeyihiin qabyo-qoraalka Warbixinta Waxqabadka Xukuumadda DanQaran.



## AGAASIMAHA GUUD IYO IOM OO KA WADA HADLAY WAAFAJINTA BARNAAMIJYADA NTP

6-da Agoosto 2026 – Agaasimaha Guud wuxuu la kulmay Madaxa IOM ee Soomaaliya, Mudane Manuel Marques Pereira. Waxaa laga wada hadlay iswaafajinta barnaamijyada iyo istaraatiijiyadda IOM iyo mudnaanta NTP 2025–2029, qorsheynta wadajirka ah, isku-duwidda dadaallada horumarinta iyo horumarinta nidaamyada xogta ee socdaalka iyo barakaca.




## AGAASIMAHA GUUD OO SOO DHOWEEYAY QORSHAHA ISTARAATIIJIYADEED EE WFP

**4-ta Agoosto 2026 –** Agaasimaha Guud ayaa ka qaybgalay daahfurka Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee WFP ee Soomaaliya 2026–2029, wuxuuna soo dhoweeyay in qorshuhu la jaanqaadayo mudnaanta NTP 2025–2029. Wuxuu carrabka ku adkeeyay xoojinta hay'adaha iyo nidaamyada qaranka, maalgelinta beeraha iyo wax-soo-saarka cuntada, iyo wada-shaqeyn dhow oo u dhexeysa dowladda iyo bah-wadaagta.

# 3. SIYAASADDA QARAN EE DEEQAHA



## SIYAASADDA QARAN EE DEEQAHA

**Agoosto 20 –** Wasaaradda Qorsheynta ayaa qabatay wadatashi heer federaal ah oo ku saabsan diyaarinta Siyaasadda Qaran ee Deeqaha Soomaaliya. Wadatashiga waxaa ka qaybgalay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha iyo wasaaradaha iyo hay'adaha Dowladda Federaalka, waxaana lagu qiimeeyay caqabadaha maamulka iyo isku-duwidda deeqaha. Ka-qaybgalayaashu waxay isla meel dhigeen aragti ku wajahan 2030 iyo dib-u-habeyn xoojinaysa isku-duwidda, daahfurnaanta, isla-xisaabtanka iyo wada-shaqeynta hay'adaha.

Agoosto 18 – Wasaaradda, iyadoo kaashanaysa Maamulka Gobolka Banaadir, waxay Muqdisho ku qabatay wadatashi ay ka qaybqaateen bulshada rayidka ah, ganacsatada iyo bahda tacliinta sare. Dooddu waxay xoogga saartay daahfurnaanta, isla-xisaabtanka, maamulka xogta, dabagalka natiijooyinka iyo waafajinta deeqaha iyo qorshayaasha horumarineed ee qaranka. Labada wadatashi waxay xoojiyeen aragti mideysan oo ku wajahan nidaam deeqo oo Soomaaliya ay si wanaagsan u hoggaamiso oo u maamusho, kana jawaaba baahiyaha mudnaanta leh.

# 4. HAWLAHA KALE EE MUHIIMKA AH



## AGAASIMAHA WAAXDA MAALGASHIGA OO KA QAYBGALAY AQOON-IS-WEYDAARSI GOBOLEED

**7-da Agoosto 2026 –** Agaasimaha Waaxda Maalgashiga, Mudane Ismaaciil Cabdalla Cali, ayaa ka qaybgalay aqoon-is-weydaarsi ay EABC ku qabatay Kampala, Uganda, kaas oo diiradda lagu saaray xoojinta awoodda hay'adaha taageera ganacsiga iyo maalgashiga ee EAC. Wuxuu sidoo kale la kulmay Ku-xigeenka Agaasimaha Guud ee Uganda Investment Authority si looga wada hadlo fududeynta maalgashiga iyo dhisidda awoodda hay'adaha.



## WASIIRKA OO DAAHFURAY MASHRUUCA ADKEYSIGA CIMILADA IYO HORUMARINTA BIYAHA

**3-da Agoosto 2026 –** Wasiirka ayaa Laascaanood ka daahfuray Mashruuca Adkeysiga Isbeddelka Cimilada iyo Horumarinta Biyaha ee Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya. Mashruucu wuxuu diiradda saarayaa horumarinta kaabeyaasha biyaha iyo xoojinta adkeysiga bulshada ee saameynta isbeddelka cimilada. Waxaa sidoo kale lagu dhawaaqay ballaarinta mashruuca laba goobood oo dheeraad ah oo ku yaalla Sool iyo Sanaag.

# GABAGABO

**Agoosto 2026 waxay ahayd bil aad xooga loo saaray wadashaqeynta u dhexeysa hoggaanka Wasaaradda, hay'adaha dowladda iyo bah-wadaagta horumarinta. Diiradda waxaa la saaray qorsheyn ku saleysan xog iyo caddeymo, isku-duwidda taageerada horumarineed, maalgashi, adkeysiga bulshada iyo dardargelinta hirgelinta NTP 2025–2029. Dhanka kale, diyaarinta Warbixinta Waxqabadka Xukuumadda DanQaran 2022–2026 waxay gashay wejiyo muhiim ah oo xaqiijin, ansixin iyo dhammaystir ah.**

**Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha - Soomaaliya**
Ministry of Planning, Investment and Economic Development

# WARSIDAHA WASAARADDA

## AGOOSTO 2026

WARBIXIN KOOBAN OO KU SAABSAN HOGGAANKA, SIYAASADAHA, ISKAASHIGA IYO WAXQABADKA WASAARADDA.

**Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha - Soomaaliya**

Ministry of Planning, Investment and Economic Development

# WARSIDAHA WASAARADDA AGOOSTO 2026

@mopied